



Ma la kulantay takoorid ama cunsuriyad?

**Tilmaamo iyo warar meelaha la xiriirayo ah oo loogu
talagalay dadka takooridda iyo cunsuriyadda loo
geystey**



Sii dhaweyn

Takoorid waxaa la dhihi karaa, haddii dadka la kala sooco iyadoo sal ahaan loo adeegsanayo waxyaabo aan raalli laga noqon karin. Takooriddu waa marka la sameeyo ficil qof shakhsi ah ama koox dad ah u keenaya, inay xaaladoodu ama jagadoodu ka xumaato midda dadka kale, taasoo ay sabab u tahay asalka jinsiyadda, midabka, labnimo ama dheddignimo, da'da, wuxuu qofku aaminsan yahay, naafonimo ama xagga isutagga sekshewalka qofku wuxuu jecel yahay (khaniis iwm.). Badanaa takooridda waxyaabo badan baa sal u noqon kara (Tusaale ahaan qofku asalka jinsiyadiisa iyo da'diisa dartood buu takoorid ula kulmi karaa) ama takooridda oo dadban buu la kulmi karaa, oo waxa la samaynayo uma muuqdaan in cid lagu takoorayo, laakiin maxsuulka ka soo baxa ayaa keenaya inay caddaalad daro kala sarayn ahi timaado, taasoo ay sabab u yihiin waxyaabaha kor lagu soo sheegay.

Cunsuriyadda iyo ajnebi nacaybka waxaa loola jeedaa waa, marka hal qof ama koox dad ahi fikrado nacayb iyo xumaan ah ama mararkay ugu daran tahay xitaa fikrad dagaal ah u hayaan dad ka tirsan koox jinsiyad gaar ah, ama asalkay ka soo jeedaan gaar yahay, ama diin iyo dhaqan gaar ah leh. Cunsurinimadu shakhsi ahaan qofka uguma timaado ee waxay ugu timaadaa kooxduu ka tirsan yahay dartiis.

Takooridda iyo cunsuriyaddu dhibaatooyin badan oo kala duwan bay u keenaan qofka dhibanaha ah. Inkastoo sharciga Finland iyo heshiisyo badan oo caalami ahi aqoonsan yihiin inay dadka oo dhan

siman yihiin, hadana waa dhif inay dadka waddanka u soo guurey, romanka, naafada iyo dadka kale ee ay sahan tahay in la takoor dalbadaan caawimo iyo in laga xaal mariyo sida xun ee loola dhaqmay. Ujeeddada ugu weyn ee buuggani waa inuu tilmaan siiyo dadka dhibanayaasha ah ee takooridda iyo cunsuriyadda la kulmay, iyo weliba inuu shaqaalaha xirfadaha kala duwan ka kiciyo fadhiga oo ku baraarujiyo sidii arrinta wax looga qaban lahaa.

Buuggan tilmaanbixiyaha ahi waa qoraalka la dagaalanka takooridda ee magaalada Vantaa oo cusboonaysiin lagu sameeyey. Buuggu wuxuu ka kooban yahay qayb sharciga ah oo wakhtiga la soctta iyo macluumaadka muhiimka ah ee la soo xiriiridda deegaanada Helsinki, Espoo iyo Vantaa. Hawsha cusboonaysiinta buugga waxaa suurageliyey Mashruuca Join (JOIN-projekti) ee Ururka Midowga Yurub iyo Wasaaradda Shaqada. Mashruucan waxaa lagu raadinayey sidii hawlaha shaqaalaha maamulka kala duwan ee degmooyinka loogu heli lahaa habab fiican oo la fulin karo oo lagula dagaalamayo takooridda.

Waxay tahay inaan ku faraxsanaanno, in kooxo badan oo ah dad ahi – qaarkood yihiin shaqaalaha mushahaariga ah ee qaranka, degmooyinka iyo ururada, intooda badanse yihiin dad iskaa wax u qabso ku shaqeeya oo ka socda ururada kala duwan ee shacabka iyo dadka isbiirsaday ay siyaabo kala duwan ugu hawshoon yihiin, siday Finland u noqon lahayd meel dadka oo dhan ku siman yihiin. Qof walba oo raba inuu takooridda la dagaalamo, waa hubaal inuu heleyo hab uu kula dagaalamo.

Meija Tuominen

Takooridda iyo cunsuriyadda waa la mabnuucay

Dastuurka Finland

Siduu dhigayo qodobka 6 § ee dastuurka Finland, sharciga hortiiisa dadku way ku siman yihiin.

Hadaanay jirin sabab raalli laga noqon karo, qofnaba si gaar ah loolama dhaqmi karo iyadoo sal looga dhigayo lab ama dheddig uu yahay, da'diisa, asalkiisa, luuqadiisa, diintiisa, wuxuu aaminsan yahay, fikraddiisa, xaaladdiisa caafimaad, naafonimadiisa ama wax kale oo qofka saameeya.

Middan oo loo yaqaan mabnuucidda takooridda ee guud waxay ka mid tahay xuquuqda aasaasiga ah iyo xuquuqda bini-aadanimada, waxayna ku salaysan tahay heshiisyada caalamiga ah ee Finland ay ballanqaaday inay dhawrto.

Qodobka 17 § ee dastuurka Finland waxaa lagu dejiyaa, xuquuqda ay kooxaha jinsiyadaha ahi u leeyihiin inay ilaashadaan oo kor u qaadaan luuqadooda iyo dhaqankooda.

Heshiisyo caalami ah oo badan sida:

Heshiiska Guud ee Ururka Qaramada Midoobey ee ku saabsan xuquuqda shacabka iyo siyaasadda wuxuu dhigayaa, in dadka jinsiyad, diin ama luuqad ahaan tiradoodu yar tahay aan diidi karin xuquuqdooda ah inay si wadajir ah xubnahooda kale ugula raaxaystaan

dhaqankooda, qirtaan diintooda oo ay ku dhaqmaan, luuqadoodana isticimaalaan.

Siduu qabo **Heshiiska Xuquuqda Bini-aadanka ee Guddiga Yurub** xuquuqaha iyo madaxbannaanida lagu aqoonsaday heshiiskan waa in la sugaa oo uu qof waliba helaa iyadoon haba yaraatee loo eegeyn lab iyo dheddig midkuu yahay, jinsiyadiisa, midabka jirkiisa, luuqadiisa, diintiisa, siyaasadiisa ama fikradihiiisa kale, asalkiisa qarannimo ama bulshanimu, jinsiyad ahaan inuu koox yar ka tirsan yahay, hantidiisa, asalka dhalashadiisa ama wax kaloo takoorid sal ku leh.

Xeerka (direktiivi) 2000/43/EY ee Guddiga Ururka Midowga Yurub wuxuu suuragelinayaa, in wax laga qabto takooridda ku salaysan jinsiga iyo asalka, si ay u hirgasho fikradda ah in si isku mid ah dadka loogula dhaqmo waddamada ururka xubnaha ka ah.

Buugga aasaaska arrimaha bulshada ee Yurub waxaa ku lifaaqan amar lagu mabnuucayo takooridda iyo amarro kale oo badan oo ah sinnaanta, si loo sugo xuquuqaha heshiiska ku jira.

Sharciga sinnaanta (21/2004, wuxuu dhaqan galay 1.2.2004; fiiri www.finlex.fi/linkit/sd/20040021):

6 § Mabnuucidda takooridda

Qofnaba lama takoori karo iyadoo sal looga dhigayo da'diisa, asalkiisa ama jinsiyadduu u dhashay, waddankiisa, luuqaddiisa, diintiisa, wuxuu aaminsan yahay, fikraddiisa, xaaladdiisa caafimaad, naafonimadiisa, nooca uu u jihaysan yahay lab/dheddig ahaan ama sabab kale oo qofka la xiriirta. Mabnuucidda takooridda ee ay salka u tahay lab/dheddignimadu waxaa lagu caddeeyey sharciga ku saabsan sinnaanta ragga iyo dumarka dhexdooda (609/1986).

Takooridda waxa loola jeedaa:

- 1) waa iyadoo qof loola dhaqmay si ka xun sida loola dhaqmay ama loola dhaqmi lahaa qof kale oo xaaladdiisu u dhiganto midda qofkan (*takoorid aan dahsoonayn = välitön syrjintä*);
- 2) waa iyadoo sabab, xeer ama hab dhaqan la allifey oo lagu sheegay inuu dhexdhexaad yahay uu qofka ka dhigayo inay jagadiisu ka xumaato kuwa dadka kale ee isaga la midka ah, waxaase taas ka baxsan, haddii sababta, xeerka ama hab dhaqanku uu leeyahay hadaf la aqbali karo, si hadafka loo gaarana habka la isticimaalay uu yahay mid hagaagsan oo loo baahan yahay (takoorid dahsoon);
- 3) waa haddii sharafta iyo ku xadgudub la'aanta qof ama koox dad ah si ku talagal ah ama caddaan ah loo dhaawaco, iyadoo la abuurayo hanjabaad, colaad, quursasho, ceebayn ama dhibitaan leh;
- 4) iyadoo la siiyo tilmaan ama amar ah in la takooro.

Sharciga isu dhiganka sinnaanta ah waxaa lagu dhaqmaa oo uu sal yahay shaqo u qaadashada, xaaladaha

shaqada, shuruudaha shaqada, heer sare ku gaaridda shaqada iyo waxbarashada iyo weliba u hirgelinta ganacsiga iyo taageeridda waxqabadka ganacsiga helitaanka nolol maalmeedka. Xagga heshiisyada shaqada iyo adeegga waxaa sharcigan ilaalintiisa u xilsaaran qaybaha badbaadada shaqada (www.tyosuojelu.fi).

Sidoo kale qofka asalkiisa hore dartiis si gaar ah loolama dhaqmi karo xagga arrimaha ku saabsan adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka, faa'iidooyinka badbaadada bulshada ama waxyaabaha kele ee taageerada ama faa'iidooyinka dadka loogu ogolaado sabab arrimo bulsho ahaan. Arrintan waxay saamaysaa waajibaadka gurmada (asevelvollisuus), gurmada madax bannaanida ah ee dumarka ama shaqo qaran ahaan ku gudashada gurmada iyo waxyaabaha kale (xitaa adeegga guryaha) ee aan ka ahayn bixinta iyo helitaanka alaabta, hantida iyo adeegga ee dad shakhsiyaad ah dhexdooda ah. Xagga takooridda ku salaysan asalka qofka, shirciga ku dhaqmid diisa waxaa ilaaliya wakiilka dadka tiro ahaan yar (www.mol.fi).

Qofka sharciga jebiya waxaa dhicii karta inay noqoto, inuu qofka uu takooray siiyo xaal ugu badnaan noqon kara 15 000 euro.

Takooridda iyo cunsuriyaddu waa dembi

**Sharciga dembiga ee Finland:
Marka adeegyada ay bixinayaan hay'adaha
dowliga ah iyo kuwa shicibka ahba, takooriddu
waa dembi.**

Takooridda

Sharciga dembiga 11 qaybtiisa 9 §

Qofka ganacsiga, xirfadda lagu shaqaysto, u adeegga dadweynaha, xilka maamulka ama hawlaha kale ee dadweynaha amaba munaasabad guud ama shir guud oo la qabanqaabiyey sabab la aqbali karo la'aanteed

- 1) aan qof ugu adeegin habka shuruudaha guud,
- 2) u diida qofka inuu soo galo meesha munaasabadda ama shirka, amaba ka saara amaba
- 3) ka dhiga qofku inuu ka qiima duwan yahay oo ka liito kana xunyahay dadka kale jinsigiisa, asalka oo ka soo jeedo, midabka jirkiisa, luuqaddiisa, lab iyo dheddig midkuu yahay, da'diisa, xiriirkiisa qoys ahaaneed, isu tag ahaan rag iyo dumar midkuu jecel yahay ama xaaladdiisa caafimaad amaba diintiisa, fikraddiisa bulshada, waxqabadkiisa siyaasadeed ama xirfadeed ama wax kale oo kuwan la barbar dhigi karo darteed, waa in lagu xukumaa takooridda darteed ganaax lacageed ama xabsi ugu badnaan lix bilood ah, haddii aanu ficilku ahayn mid laysku ciqaabo xagga takooridda shaqada.

Waa dembi, in dad jinsiyad ah si ula kac ah loo aflagaadeeyo ama loogu hanjabo.

Ku guubaabinta dadka lagu guubaabinayo koox jinsiyad ah

Sharciga dembiga 11 qaybtiisa 8 §

Qofka dadka dhexdooda ku faafiya warar ama waxyaabo kale oo loogu hanjebayo, lagu aflagaadeynayo ama lagu caynayo koox dad ah dhalashadooda, jinsiyadooda, asalkay ka soo jeedaan ama diintooda amaba wax kale oo kuwaas la barbar dhigi karo dartood, waa in maadaama uu dadka ku kicinayo koox jinsiyad ah lagu xukumaa lacag ganaax ah ama ugu badnaan laba sannadood oo xabsi ah.

Takooridda shaqada dhexdeeda ah ee ku salaysan diinta, jinsiyadda ama wax kale oo asalka qofka ah waa dembi.

Takooridda shaqada

Sharciga dembiga 47 qaybtiisa 3 §

Shaqabixiyaha ama qofka wakiilka u ah ee sabab weyn oo la aqbali karo la'aanteed, markuu shaqaale inuu u baahan yahay sheegayo, markuu qaadanayo shaqaalaha amaba intuu socdo heshiiska shaqadu qofka shaqada dalbanaya ama shaqaalaha ah marxaladiisa ka dhiga mid aan shaqaalaha u fiicnayn

- 1) jinsigiisa, dhalashadiisa ama asalkiisa hore, midabka jirkiisa, luuqadiisa, lab iyo dheddig midkuu yahay, da'diisa, xiriirkiisa qoys ahaaneed, isu tag ahaan rag iyo dumar midkuu jecel yahay ama xaaladdiisa caafimaad amaba

2) diintiisa, fikraddiisa bulshada, waxqabadkiisa siyaasadeed ama xirfadeed ama wax kale oo kuwan la barbar dhigi karo darteed, waa in lagu xukumaa takooridda shaqada darteed ganaax lacageed ama xabsi ugu badnaan lix bilood.

Yaa go'aaminaya inuu dembi dhacay iyo in kale?

Marka hore **booliska iyo xeerilaaliyaha** ayaa qiyaasaya, in arrin keligeed ah ama habka wax loo sameeyey yahay dembi. Go'aanka kama dambaysta ah waxaa arrinta ka gaara **maxakamad**. Booliska waxaa waajib ku ah inay qoraan arrinta uu qofka macaamiisha ahi u arko inay dembi tahay.

Takooriddu mar walba ma dembi baa?

Wax walba oo loo dareemo cunsuriyad ama takoorid ahaan dembi ma aha. Waxaa embi loo arkaa wax ku talagal loo sameeyo, maxakamaddana xeerilaaliyaha ayaa laga rabaa inuu caddeeyo, in waxa la sameeyey oo takooridda loo dareemay ay sabab u ahayd jinsiyadda qofka, midabka jirka, asalka uu ka soo jeedo ama wax kale oo u dhigma, ee aanay sababtu ahayn mid la aqbali karo.

Qof shakhsi ah dhaqan xumadiisa ama si xun oo uu ula dhaqmo dadka waddanka u soo guurey amaba dadka waayeelka ah dembi ma aha. Xeerka guud waa, dembi waxaa loo arkaa takooridda dhacda marka qofka la siinayo ganacsiga nolosha ama adeegyada dowliga ah iyo shaqada.

Hase ahaatee fikradaha takooridda ah iyo fikrad xumada khaladka ah siyaabo badan oo kala duwan ayaa lagaga soo horjeesan karaa. Wadahadal, helitaanka aqoonta, isbarashada iyo wadashaqaynta ayaa lagaga hortegi karaa fikradaha takooridda ah, sidaas baana lagu dhimi karaa waxyaabaha khaladka ah ee layska fahansan yahay.

Tilmaamid loogu talagalay dadka takooridda iyo cunsuriyadda loo geystey iyo markhaatiga

Haddii qof caafimaadkiisa ama nabadgelyadiisu khatar ku jirto, soo wac (meel walba oo Finland ah)

lambarka khatarta guud 112 ama

lambarka khatarta ee booliska 10022.

Xaaladda takooridda ka dib xusuus ahaan u qoro

- waxa dhacay
- wakhtiga ay wax dheceen: maalinta iyo saacadda
- meeshay wax ka dheceen: meesha oo cad
- qofka wax sameeyey: qofka wax sameeyey, shaqaalaha maamulka ama qofka ganacsadaha ah magaciisa (Shaqaalaha maamulka ee degmada ama qaranku markuu shaqada ku jiro waa waajib inuu magaciisa u sheegaa, haddii qofka macaamiisha ahi weyddiyo) ama qofka ama kooxda astaamaha lagu garan karo
- Qof kale oo isna arrinta arkay oo markhaati ka ahaa (iyo meesha lagala soo xiriiri karo)

ka dibna aad saldhigga booliska ee kuugu dhow. Dacwada dembiga ah waxaa shakhsi ahaan loo geeyaa saldhigga booliska ee goobta dembigu ka dhacay ka tirsan tahay.

Tilmaamid cad oo ku saabsan waxyaabaha ay tahay inuu qofka dembiga laga galay sameeyo waxaa iyagoo

luuqado kala duduwan ah laga heleyaa cinwaanka www.ihmisoikeusliitto.fi.

Marka dembiga baaritaankiisa socdo qofka dembiga laga galay wuxuu xaq u leeyahay, inuu luuqadda uu yaqaanno isticimaalo. Haddi ay suuragal tahay in turjubaanid loo baahdo, waa in booliska hore loogu sii sheegaa oo lagala heshiyaa.

Saldhigyada booliska (www.poliisi.fi)

Saldhigga Booliska ee **Helsinki** wuxuu u qaybsan yahay afar hogaan, hogaan walbana wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta nidaamka iyo baaritaanada dembiyada deegaankiisa iyo arrimaha ogolaanshaha u baahan ee deegaanka hoos yimaada. Lambarka telefoonada laga gudbiyo ee Saldhigga Booliska ee Helsinki waa (09) 1891 (wuxuu furrar yahay maalmaha shaqada saacadaha 8–16.15). Waxaad kaloo fiirisaa www.poliisi.fi/helsinki.

- Keskusta (Bartamaha): Pieni Roobertinkatu 1-3, 00130 Helsinki, tel. (09) 189 4175
- Itäkeskus: Tallinnanaukio 1, 00930 Helsinki, tel. (09) 189 4332
- Malmi: Viljatie 2, 00700 Helsinki, tel. (09) 189 4391
- Pasila: Pasilanraitio 13, 00240 Helsinki, tel. (09) 189 4740

Saldhigga Booliska ee **Espoo**:
Nihtisillankuja 4, 02630 Espoo,
tel. (09) 52 541; www.poliisi.fi/espoo

Saldhigga Booliska ee **Vantaa**:
Kielotie 21, 01300 Vantaa,
tel. (09) 87 301; www.poliisi.fi/vantaa

Yaa dadka caawiya oo kala taliya arrimaha ku saabsan dembiyada?

Xafiiska caawinta sharciyada

(fiiri www.oikeus.fi iyo www.om.fi/14236.htm)

ayaa laga helaa qareen (looyar) dadka ka caawiya arrimaha la xiriira maxakamadda la qaadayo.

- Xafiiska caawinta sharciyada ee **Helsinki**: Porkkalankatu 13 G, 00180 Helsinki, tel. (09) 010 36 60100, helsinki.oikapu@om.fi
- Xafiiska caawinta sharciyada ee **Espoo**: Pihatörmä 1 A, 02240 Espoo, tel. (09) 010 36 60060, espoo.oikapu@om.fi
- Xafiiska caawinta sharciyada ee **Vantaa**: Talvikkitie 37, 01300 Vantaa, tel. (09) 010 36 60160, vantaa.oikapu@om.fi
- Xafiiska caawinta sharciyada ee magaaloo madaxda iyo nawaaxigeeda: Mannerheimintie 4, 00100 Helsinki, tel. (09) 010 36 61820, paakaupunkiseutu.oikapu@om.fi

Dhexdhexaadinta dembiyada iyo iska horimaadka (www.sovittelu.com)

waa fursad suuragal ah, oo lagu baari karo laguna xallin karo xaaladaha ay keenaan dembiyada iyo iska horimaadka. Dhexdhexaadinta waxaa lagaga hadli karaa waxyaabaha ay ka midka yihiin dagaalka dlitaanka ah, khasaare geysashada iyo dembiyada qof hantidiisa loo geysto. Sidoo kale arrimaha iska horimaadka ah waa la dhexdhexaadin karaa. Qofka ay arrinta dembiga ama iska horimaadka ahi khusayso wuu dalban karaa dhexdhexaadinta, isagoo la xiriirayaa xafiiska dhexdhexaadinta ama boolisku markay waraysanayaan buu u sheegeyaa inuu dhexdhexaadin rabo. Inta badan

dhexdhexaadinta waxaa lagaga maarmi karaa maxakamadda dacwadii lagu qaadayey ama dhexdhexaadinta ayaa la tixgelinayaa marka qofka ciqaabta lagu xukumayo la go'aaminayo. dhexdhexaadiyayaalku waa dad shaqadan loo tababaray oo iskaa wax u qabso ku shaqeeya.

Xafiisyada dhexdhexaadinta ee magaaloooyinka Helsinki iyo Vantaa waxay soo saareen oo horumar ku sameeyeen hab tusaale ah oo dhexdhexaadin ah, looguna talagalay in lagu xalliyo khilaafka ka dhex dhasha dadka waddamada kala duwan ka yimi iyo khilaafka ka dhex dhasha kooxaha jinsiyadaha kala duwan (fiiri www.iom.fi/letstalk).

- Xafiiska dhexdhexaadinta ee **Helsinki**:
Waaxda arrimaha bulshada/ Dhismaha waaxda ee Kallio, Toinen linja 4 G (wadadu la siman yahay), 00530 Helsinki, tel. (09) 3104 3517 ama 3104 3371 ama 3104 3479, sovittelu@hel.fi
- Xafiiska dhexdhexaadinta ee **Espoo**:
Espoonkatu 4, 02070 (dabaqa 4aad), 02270 Espoo, tel. (09) 8163 2535 ama 8163 2537
- Xafiiska dhexdhexaadinta ee **Vantaa**:
Adeegyada arrimaha bulshada ee laysu geeyey (Keskitetyt sosiaalipalvelut), Peltolantie 2 B, 01300 Vantaa, tel. (09) 8392 3037 ama 8392 3038, sovittelu@vantaa.fi

Heeganka caawiya dadka dembiga laga galay (www.rikosuhripaivystys.fi)

Xafiiska deegaanka Uusimaa wuxuu ku yaallaa cinwaanka Maistraatinportti 4 A, 00240 Helsinki, tel. (09) 413 50550. Xafiiskan wuxuu talooyin iyo taageero xagga

nafsadda ah siiyaa dadka dhibanayaalka ah ee dembiga laga galay ama laysku dayey in dembi laga galo, dadka dembiga laga galay ehelkooda iyo markhaatiyada. Markaad xafiiskan la soo xiriirayso khasab maaha inaad dembiga dacwo ka geysey. Adeeg lacag la'aana oo ah qof ku taageeraya.

Telefoonka caawinta (Isniin-Talaado saacadda 13-21, Arbaco-Jimce saacadda 17-21), tel. 0203-16116

talo ka helidda looyarka (Isniin-Khamiis saacadda 17-19), tel. 0203-16117

Qof taageere ah: Xafiiska deegaanka Uusimaa (kor fiiri)

Caawimo iyo badbaado afar iyo labaatan saac ah oo ah markay xaalad dhibaato weyn jirto (waxaad kaloo ka fiirisaa boggaga bilowga ah ee buugga telefoonada AUTTAVAT PUHELIMET):

- **Helsinki:** adeegga SOS, tel. (09) 4135 0510 iyo baabuurka wareegga ee SOS (waxaa laga helaa caawimo wadahal ah iyo haddii loo baahdo in guriga laguugu yimaadaba) tel. 040-503 2199 (24 saac/maalintii)
- **Espoo:** maalmaha shaqada saacadda 08-15 xarumaha arrimaha bulshada iyo caafimaadka iyo telefoonadooda la waco markay khatar jirto:
Espoon keskus (09) 8163 2000
Espoonlahti (09) 8164 6000
Leppävaara (09) 8163 5000
Matinkylä-Olari (09) 8164 2000
Tapiola (09) 8163 7000

Isniinta ilaa Jimcaha saacadda 15- 08, Sabtida iyo Axadda waa afar iyo labaatan saac: Heeganka dhibaatooyinka waaweyn iyo arrimaha bulshadu waa Isbitaalka Jorvi, Turuntie 150, tel. (09) 8164 2439

- **Vantaa:** Xarunta dhibaatooyinka waaweyn (Kriisikeskus), Kielotie 15, tel. (09) 8392 4005 (24 saac/maalintii)

Guriga Ammaanka (Turvakoti) (www.turvakoti.net)

Guriga Ammaanka waxaa laga helaa caawimo iyo badbaado afar iyo labaatan saac ah, markay jirto dhibaato dagaal qoyska dhexdiisa ah.

- **Helsinki:** Guriga Ammaanka ee Magaalomadaxda (Pääkaupungin turvakoti),
Steniuksentie 20, tel. (09) 477 7180
- **Espoo:** Guriga Ammaanka ee Espoo (Espoon turvakoti),
Jänismetsäntie 2, tel. (09) 591 5130
(waxaad kaloo fiirisaa www.espoonturvakoti.com)
- **Vantaa:** Guriga Ammaanka ee vantaa (Vantaan turvakoti),
Katrintie 11, tel. (09) 8392 0071

Guriga Ammaanka ee dhallinyarada loogu talagalay ee Ururka Laanqayrta Cas ee Finland (Suomen Punaisen Ristin turvatalo nuorille)
(www.redcross.fi/apuajatukea/nuortenturvatalot)

Guriga Ammaanka ee Ururka Laanqayrta Cas ee Finland (24 saac/maalintii) waxaa loogu talagalay dhallinyarada ka yar 19 sano. Waxaa laga helaa caawimo iyo talooyin ku saabsan siduu qofku xaaladda noloshiisa xal ugu heli lahaa. Waxaa kaloo haddii loo baahdo laga helaa meel loo hoydo oo ku meel gaar ah.

- **Helsinki:** Uudenmaankatu 32 A 6,
tel. (09) 622 4322; turvatalo.helsinki@redcross.fi
- **Espoo:** Kipparinkatu 2 as 19,
tel. (09) 819 55360; turvatalo.espoo@redcross.fi
- **Vantaa:** Sairaalakatu 3,
tel. (09) 871 4043; turvatalo.vantaa@redcross.fi

Caawimo wadahal ah iyadoo lays hor fadhiyo ama telefoon:

Waxaad kaloo fiirisaa boggaga bilowga ah ee buugga telefoonada AUTTAVAT PUHELIMET iyo www.apua.info

Ururka Kaniisadaha Evankeli-luteraanka ah

(www.evl.fi)

Waxaa laga hellaa taageero xagga nafsadda ah iyo mid xagga arrimaha bulshada ah iyo weliba adeegyo badan oo kala duduwan iyo waxqabadyo luuqado kal duwan ku fula. Waxaa jira habab ka qaybqaadasho ah oo tusaale ahaan dadka waddanka u soo guurey loogu talagalay.

- **Helsinki:** Lambarka telefoonka ee Isutagga ururka kaniisadaha ee Helsinki (09) 23 400 (Helsingin seurakuntayhtymän puhelinkeskus);
www.helsinginseurakunnat.fi
- **Espoo:** Lambarka telefoonka ee Isutagga ururka kaniisadaha ee Espoo (09) 80 501 (Espoon seurakuntayhtymän puhelinkeskus);
www.espoonseurakunnat.fi
- **Vantaa:** Lambarka telefoonka ee ururka kaniisadaha ee Vantaa (09) 83 061 (Vantaan seurakuntien puhelinkeskus);
www.vantaanseurakunnat.fi

Ururka kaniisadaha ortodokska ee Helsinki

(www.ort.fi/helsinki)

tel. (09) 6844 0421 shaqada arimaha bulshada ee kaniisada (diakoniatyö) waa noocyo badan oo ah caawino siinta dadka kaalmada u baahan. Espoo iyo Vantaa waxay ka tirsan yihiin deegaanka ururka kaniisadda ee Helsinki.

Telefoonka carruurta iyo dhallinyarada 0800 120 400;

(www.mll.fi)

Lambarkaas ayey carruurta iyo dhallinyaradu soo wici karaan, iagoon magacooda sheegin bayna dadka shaqaalaha ah kal hadli karaan oo kala sheekaysan karaa arrin kasta waxay doonto ha ahaatee; waa lacag la'aan; wuxuu furan yahay Isniin-Jimce saacadda 14-20, Sabti iyo Axad saacadda 17-20. Waxaa si wada jir ah ula

shaqeeya Hay'adda badbaadada carruurta ee Mannerheim (Mannerheimin lastensuojeluliitto). waxaad kaloo fiirisaa www.lastenjanuortennetti.net

Folkhälsans samtalsjour 0800 151100;

(www.folkhalsan.fi)

Caawimo wadahadal ah oo dhallinyarada loogu talagalay, waana luuqadda Iswiidhishka; waxay furan tahay maalmaha shaqada saacadda 15-20; com.in@folkhalsan.fi

Ururka Caafimaadka Maskaxda HELMI ry

(www.mielenterveyshelmi.fi)

goobteeda kaalmada waxaa laga helaa caawimo wadahadal ah iyo talooyin ku saabsan arrimaha caafimaadka maskaxda; tel. (09) 8689 0727 wuxuu heegan yahay Jimce saacadda 16-20, Sabti iyo Axad saacadda 10-20

Laynka dumarka (Naisten linja)

(www.naistenlinja.com)

wuxuu taageeraa dumarka iyo gabdhaha la kulma dagaalka ama hanjabaad dagaal; waa lacag la'aan; toimisto@naistenlinja.com

- **tel. 0800 02400**
- **af Finnish;** isniin - jimco 16-20
- **af Iswiidhish;** arbacada 16-20
- **af Ruush;** isniinta 16-20
- **af Ingariiska** jimcaha 16-20

Ururka Sinnaanta Sekshiwalka (Seksuaalinen tasavertaisuus SETA ry.)

(www.seta.fi)

Waa urur ballaran oo xuquuq bini-aadan, adeegid iyo aqoonyahan oo u xilsaarann arrimaha dadka seshiwal ahaan iyo lab/dheddig ahaan tiradoodu yar tahay iyo weliba waxyaabaha kale ee la xiriira arrimaha sekshiwalka. Mannerheimintie 170 A, 00300 Helsinki;

tel. (09) 681 2580, info@seta.fi.
Telefoonka heeganka Khamiisaha iyo Axadaha saacadda
18-21 lambarka (09) 6812 5855.

Taageeridda dumarka (Tukinainen)

(www.tukinainen.fi)

waxay caawisaa dumarka iyo gabdhuhu si ay uga
raystaan dagaalka sekshiwalka ah iyo faraxumaynta lagu
sameeyey, tel. (09) 5860 360;
office@tukinainen.fi

Ururka naafada ee KYNNYS ry.

(www.kynnys.fi)

Tel. (09) 6850 1188; keskustelu@kynnys.fi

Ururka guriga ammaanka waayeelka ee SUVANTO ry.

(www.ensijaturvakotienliitto.fi/suvanto)

wuxuu caawiyaa oo talo ka bixiyaa dhammaan arrimaha
la xiriira si xun ula dhaqanka waayeelka; lambarka (09)
726 2422 telefoonka la talintu waa Talaadooyinka
saacadda 12-15 iyo talasiinta xagga sharciga Sabtiyada
toddobaad walba oo dhaban ah saacadda 10-12;
info@suvantory.fi

Cinwaanno iyo aqoon muhiim ah oo gaar ahaan loogu talagalay dadka waddanka u oo guurey iyo ajnebiga

Xafiiska dadka waddanka u soo guurey

wuxuu u xilsaaran yahay qaxootiga si sharci ah degmada u yimaada iyo dadka asalkoodu waddankan ka soo jeedo ee soo noqday qaabilaadooda, la talintooda, adeegyadooda caafimaadka, shaqada iyo la qabsashada waddanka oo ah muddo 1-3 sano ah.

- **Xafiiska dadka waddanka u soo geerey ee magaalada Helsinki** (Helsingin kaupungin maahanmuuttoyksikkö): Dagmarinkatu 6, 00100 Helsinki; tel. (09) 169 4141; www.hel.fi; mayk@hel.fi; xafiiska soshalka ee bariga ee wargelinta iyo talosiinta dadka waddanka u soo guurey (Itäinen sosiaaliasema / maahanmuuttajien neuvontapiste), Tallinnanaukio 1 A; tel. (09) 3106 2674
- **Xafiiska dadka waddanka u soo geerey ee magaalada Espoo** (Espoon Kaupungin maahanmuuttajayksikkö): Virastotalo 1, Espoonkatu 4, 02770 Espoo; tel. (09) 816 23454; www.espoo.fi; iyo weliba afar goobood oo la talin iyo xarumo waxqabad ah oo xaafadaha ku kala yaallaa:
 - Espoon keskus, Pappilantie 5, tel. 050 308 0984
 - Espoonlahti/Kivenkolo, Merisaapas 1 A, tel. (09) 816 45500
 - Leppävaara, Lökkisepänkuja 3 a, tel. (09) 816 35011
 - Matinkylä, Matinkatu 22 (suuqii weynaa ee hore), tel. (09) 816 57117

- **Xafiiska adeegyada dadka waddanka u soo guurey laysugu geeyey ee magaalada Vantaa** (Vantaan kaupungin maahanmuuttajien yhteispalvelutoimisto): Vernissakatu 6, 01300 Vantaa; tel. (09) 8392 3250; www.vantaa.fi

Isuduwaha arrimah dadka waddanka u soo guurey (Maahanmuuttajakoordinaattori)

wuxuu la socdaa oo ka warhayaa xaaladaha nolosha ee dadka jinsiyadaha kala duwan ee magaalada deggan, wuxuu ka shaqeeyaa siday isaqbaliddu u hagaagi lahayd wuxuuna horumar ku sameeyaa oo kordhiyaa shaqada shaqada hawlaha dadka waddanka u soo guurey iyo shaqada dhaqamada tirada badan, isagoo si wadajir ah ula shaqaynaya laamaha kala duwan ee maamulka iyo qolyaha kale ee wax wadaqabsiga lala leeyahay. Waana qofka sida ugu fiican looga ogaan karo wararka ku saabsan mashruucyada tirada badan ee la xiriira arrimaha dadka waddanka u soo guurey iyo dhaqamada kala duwan (waxaad kaloo fiirisaa magaalada boggageeda www).

- Isuduwaha hawsha dadka waddanka u soo guurey ee magaalada **Helsinki**, tel. (09) 3104 2303
- Isuduwaha dadka waddanka u soo guurey ee magaalada **Espoo**, tel. (09) 8165 1055
- Isuduwaha arrimaha dhaqamada kala duwan ee magaalada **Vantaa**, tel. (09) 8392 6058

Ururka Caalamiga ee Hakunila (Hakunilan kansainvälinen yhdistys)

(www.hakunila.org)

Iluqado badan oo kala duwan ayuu dadka ajnebiga ah ku siiyaa caawimo iyo talooyin. dadka Finnishka ahna wuxuu ururku siiyaa aqoon ku saabsan arrimaha ajnebiga iyo

dhaqamada shisheeye. Kannuskuja 2 A, 01200 Vantaa;
tel. (09) 2722 775; hakunilan@kolumbus.fi

Ururka xuquuqda bini-aadanka (Ihmisoikeusliitto ry.)

(www.ihmisoikeusliitto.fi)

wuxuu ilaaliyaa in xuquuqda bini-aadanka la hirgeliyo Finland iyo adduunka kaleba, waxay kaloo bixiyaan warbiximaha ku saabsan arrimaha xuquuqda bbini-aadanka, waxayna fuliyaan mashruucyo kala duwan. ururklu wuxuu kaloo isuduwaan arrimaha ka hortagga cunsuriyada (RASMUS-verkosto); cinwaanka www.rasmus.fi. Qofka cunsuriyadda lagu sameeyey, sida xun ee loola dhaqmay warbixin buu ka soo gudbin karaa isagoo isticimaalaya foom la buuxbuuxiyo oo khaas ah warbixintaa. Döbelninkatu 2, 00260 Helsinki; tel. (09) 4155 2500; info@ihmisoikeusliitto.fi

Xarunta kuwa jirdilka lagu sameeyey

(www.hdl.fi/maahanmuuttajat)

waxay daryeeshaa oo baxnaanisaa dadka qaxootiga ah ee jirdil lagu sameeyey dartiis la kulmay dhibaatooyinka tarawmada ah iyo ehelkooda. Mäkelänkatu 58 – 60, 00510 Helsinki; tel. (09) 7750 4584; kitu@helsingindiakonissalaitos.fi

Ururka dumarka ee Monika – Xarunta awoodda ee Monika (Monika-naiset ry. – Voimavarakeskus Monika)

(www.monikanaiset.fi)

xaruntu waxay la talisaa oo taageertaa dumarka iyo carruurta dhaqamada kale ka yimi ee waddanka u soo guurey ee la kulmay dhibaatooyin dagaalka oo xag nafsad iyo jir ahaaneedba leh. Caawimada waxaa la helaa iyadoo luuqado badan ah. Kinaporinkatu 2 A 8, 00500 Helsinki; tel. (09)6922 304; info@monikanaiset.fi

Boggaga laybareeriga dhaqamada kala duwan (Monikulttuurisen kirjaston MCL:n sivuilta)

www.lib.hel.fi

waxaa laga helaa xarunta dhaqamada Caalamiga ee Caisa, bangi warar oo aad u ballaaran oo laga helayo aqoon ku saabsan habka ay bulshada Finnishku u shaqayso iyo laybareeriga ajnebiga ee luuqadaha Finland dhifka ku ah.

Xarunta sharciga ee la talinta qaxootiga (Pakolaisneuvonta ry.)

(www.pakolaisneuvonta.fi)

waa urur madax banaan oo caawimo iyo talooyin xagga sharciga ah siiya kuwa magangelyada dalbaday, qaxootiga iyo ajnebiga kaleba. Ururku wuxuu ka shaqeeyaa siday jagaday dadkaasi bulshada ku leeyihiin u sii fiicnaan lahayd. Mannerheimintie 40 D 79, 00100 Helsinki; tel. (09) 2519 000; pan@pakolaisneuvonta.fi

Xarunta SOS/ SOS-keskus/SOS centre crisis prevention (Xaruntii hore ee dhibaatooyinka ee ajnebiga)

waxay kor u qaadaa sidii caafimaadka maskaxda ee dadka waddanka u soo guurey u fiicnaan lahaa. Maistraatinportti 4 A, 00240 Helsinki; tel. (09) 4135 0501; www.mielenterveysseura.fi

Ururka Laanqayrta Cas ee Finland (SPR)

(www.redcross.fi)

dadka waddanka u soo guurey waxay ka helaa caawimo iyo waxqabadyo badan oo kala duwan. Ururka Laanqayrta cas wuxuu Finland bilowga hore qaabilaa dadka qaxootiga ah ee la soo qaato, qoysaska dadka qaxootiga ah loo loo soo ogolaadayna safarka imaatinkooda ururka ayaa qabanqaabiya, dadka la baafinayo wuu raadiyaa. Ururka Laanqayrta Cas wuxuu leeyahay xeryo qaxooti, waxay tababaraan dadka loogu talagalay inay taageeraan dadka waddanka u soo guurey. Ururku wuxuu Finland gudeheeda wakiil uga yahay Hay'adda Qaxootiga (UNHCR) ee Ururka Qaramada Midoobey. Xafiiska weyn wuxuu ku yaallaa cinwaanka Tehtaankatu 1 a, PL 168, 00140 Helsinki; tel. (09) 12 931.

Xafiiska ajnebiga ee arrimaha sharciyadu (Ulkomaalaisvirasto) (www.uvi.fi)

wuxuu baaraa oo go'aan ka gaaraa arrimaha la xiriira imaatinka waddanka, joogitaanka waddanka iyo qaxootinimada iyo weliba dhalashada Finland. Boggaga www ayaa laga helaa aqoon badan oo muhiim ah. Adeegga macaamiishu waa cinwaanka Lautatarhankatu 10, 00580 Helsinki; tel. (09) 476 5500; ulkomaalaisvirasto@uvi.fi

Laba wakiil oo waddanka oo dhan ah

Wakiilka sinnaanta

(www.tasa-arvo.fi)

wuxuu ilaaliyaa, in la dhawro sharciga sinnaanta ragga iyo dumarka iyo gaar ahaan ilaalinta sharciga mabnuucaya takooridda. Wakiilku wuxuu dadka siiyaa aqoonta ku saabsan sharciga sinnaanta, wuxuuna ka warhayaa in sinnaanta ragga iyo dumarka ee qaybaha kala duwan ee nolosha bulshadu hirgasho. Xafiiska wakiilku wuxuu ku yaallaa Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo Caafimaadka. Snellmaninkatu 13, 00170 Helsinki; tel. lambarka laga gudbiyo (09) 16001; tasa-arvo@stm.fi. Lambarka telefoonka ee la talinta arrimaha la xiriira sharciga sinnaantu waa (09) 1607 3248.

Wakiilka dadka tiro ahaan yar

(www.mol.fi)

wuxuu ka warhayaa oo kor u qaadaa jagada ay bulshada kaga jiraa dadka tiro ahaan yar, hay'adaha kale ee maamulka ayuuna si wadajir ah ula ilaaliyaa in qof walba si sinnaan leh loola dhaqmo. Xafiiska wakiilku wuxuu ku yaallaa Wasaaradda Shaqada. Mikonkatu 4, 00100 Helsinki; tel. lambarka laga gudbiyo (09) 010 604 001; vahemmistovaltuutetun.toimisto@mol.fi

Romani

Guddiga la tashiga ee Romanka (www.romani.fi)

hawshiisu waa inuu wax ka qabto sidii takooriddu u baabi'i lahayn. Wuxuu kaloo horumariyaa luuqadda iyo dhaqanka Romanka, wuxuuna la socdaan oo ka warhayaa xaalad nololeedka iyo jagada ay bulshada kaga jiraan dadka tirada yar ee Romanka. Guddigu wuxuu hoos tagaa Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo Caafimaadka Kirkkokatu 14, 00170 Helsinki; tel. lambarka laga gudbiyo (09) 1607 4308.

Naafadda

Wakiilka arrimaha naafadda

ama hoghayaha arrimaha naafadu wuxuu horumariyaa inay dadka naafadda ah helaan in loola dhaqmo si la mid ah sida dadka kale loola dhaqmo, sinnaan, helitaanka xuquuqdooda aasaasiga ahna ay fusho. Wakiilku wuxuu kaloo dadka degmada ka tirsan kala taliyaa waxyaabaha ku saabsan adeegyada naafadda loogu talagalay, wuxuuna u gudbiyaa oo u tilmaamaa meesha arrintaas qaabilsan ee saxda ah. Markaad u tegeyso waxaa wanaagsan, inaad hore ugu sii sheegto.

- **Helsinki:** Toinen linja 4 A, 00530 Helsinki; tel. (09) 3104 3163
- **Espoo:** Virastotalo 1, Espoonkatu 4, 02070 Espoo; tel. (09) 8165 1044
- **Vantaa:** Viertolankuja 4 A, 01300 Vantaa; tel. (09) 8392 2026

Haddaad takoorid dareento

Arrimaha wax iibsadaha (kuluttaja-asioissa):

Aqoon guud iyo talooyin ku saabsan arrimaha badbaadada wax iibsashada iyo caawimada dhexdhexaadinta iska hor imaadka waxaa laga helaa **Hay'adda wax iibsadaha** (Kuluttajavirasto) **iy**o **wakiilka wax iibsadaha** (kuluttaja-asiamies), Haapaniemenkatu 4 A; PL 5, 00531 Helsinki;

tel. Isniin-Jimce saacadda 9-15 (09) 7726 7821;

www.kuluttajavirasto.fi, posti@kuluttajavirasto.fi.

La talinta wax iibsadahu waa waxyaabaha sharci ahaan ay degmadu u xilsaaran tahay:

- **Helsinki** Helsinginkatu 24; PL 500, 00099 Helsingin kaupunki; tel. (09) 7312 2230; www.hel2.fi/ymk/kuluttajaneuvonta
- **Espoo** Kirkkojärventie 4, 02770 Espoo; tel. (09) 8165 7995; kuluttajaneuvonta@espoo.fi; www.espoo.fi/kuluttajaneuvonta; goobaha la talintu waxay kaloo ku yaallaan suuqyada Iso Omena iyo Sello
- **Vantaa** Asematie 10 A, 01300 Vantaa; tel. (09) 8392 2406 ; www.vantaa.fi (asukas > kuluttajaneuvonta), kuluttaja.neuvonta@vantaa.fi

Adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka:

la xiriir wakiilka **arrimaha bulshada iyo bukaanka** ee degmada (**sosiaali- ja potilasasiamies**). Wakiilka shaqadiisu waa inuu kor u qaado badbaadada xuquuqda macaamiisha iyo bukaanka, kana caawiyo samaynta

dhalliisha, wuxuuna la taliyaa macaamiisha, ehelka iyo weliba shaqaalaha oo wuxuu kala taliyaa xuquuqda macaamiisha iyo bukaanku leeyihiin.

- **Helsinki** wakiilka arrimaha bulshada (sosiaaliasiamies) tel. (09) 3104 3365 iyo wakiilka bukaanka (potilasasiamies) tel. (09) 3104 3355
- **Espoo wakiilka arrimaha bulshada iyo bukaanka (sosiaali- ja potilasasiamies)** tel. (09) 8165 1032 ama 81 621
- **Vantaa** wakiilka arrimaha bulshada iyo bukaanka (sosiaali- ja potilasasiamies) tel. (09) 8392 2537

goobta shaqada:

ka hortagga iyo wax ka qabashada takooridda shaqada waxaa u xilsaaran hay'adda badbaadada shaqaalaha. Waxaad kaloo la hadli kartaa qofka goobta shaqada u xilsaaran badbaadada shaqaalaha, afhayeenka shaqaalaha ee goobta shaqada (luottamusmiehen) ama wakiilka ururka shaqaalaha. Badbaadada shaqaaluhu waxay ilaaliyaan in goobta shaqadu xeerarka sharciga dhowrto. Deegaanka badbaadada shaqaaluhu waxay wadashaqayn la leeyihiin dhinacyada kala duwan ee shaqooyinka iyo aqoonyahannada.

Deegaanka badbaadada shaqaalaha ee Uusimaa,
Paasivuorenkatu 3, 00530 Helsinki
tel. (09)774711; www.tyosuojelu.fi, helsinki.tsp@tsp.stm.fi



The European Union



against discrimination